# Golaha Wakiilada JSl

*Minuteska*

**Xogwaraysigii Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Dib-udejinta iyo Su'aalihii Mudanayaasha**

*11 Mudane ayaa Wasiirka Su'aalo waydiiyay.* **12th Feb.2011**

## *Warbixintii Wasiirka*

Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Dib-udejinta **Dr. Axmed Cabdi Gaboose** ayaa Xogwaraysi siiyay Golaha wakiilada, wasiirku wuxuu warbixin guud siiyay golaha isagoo ka hadlay shaqada wasaarada, xaalada guud ee nabadgalyada iyo arrimo kale oo khuseeya wasaarada uu madaxda ka yahay, waxaa ugu muhiimsanayaa ee wasiirku xusay waxaa ka mid ahaa.

Shaqada Wasaarada iyo laamaha hoos yimaada.

- ✓ Dhamaan amniga dalka oo dhan.
- ✓ Badhasaabada Gobolada iyo maamulka degmooyinka
- ✓ Barakacayaasha Magangalyo doonka iyo qaxootiga
- ✓ Cuqaasha iyo Madax dhaqameedyada dalka
- ✓ Ciidamada Booliiska iyo Ciidanka ilaalada bada.
- ✓ Dib-udejinta dalka iyo Gobolada.
- ✓ Waaxdii Socdaalka (immigration)

Hadaba Wasiirku wuxuu xusay waxaas oo shaqo ah wasaarada ay hoos yimaadaan ee baaxadaas leh markaanu nimi kor uun baa loo socday laakiin wuxuun baa qabyo ah sida su'aalihiinaba ka iman karta.

Wuxuu sheegay Wasiirku, inay mudnaanta siiyeen xaga Nabadgalyada, waxayna nala noqotay buu yidhi inaan Hay'adaha amniga sugno, waxaan boqolkiiba guriba u samaynay gudi la socota dadwaynaha ayaana arrintaas qabata.

Waxaana fiican buu yidhi, inay Hay'adahu amniga ka wada socdaan xaalada amniga sida Wasaarada Warfaafinta waxay ka qabqaadan kartaa wacyigalinta dadwaynaha siday u wada ilaalaashan lahaayeen amniga, duruusta wax lagu barayo ciidanka iyo cidii nabada ku shaqo leh iyo xuquuqdooda sida loo ilaalinayo. Wasaarada Diinta iyo Awqaafta waxay ka qabqaadan kartaa inay tiro koobto madaradaha, waxa lagu dhigayo iyo masaajidada iyo meelaha wacdiyadu ka socdaan waxa ka socda iyo curriculumka laga jeedinayo, si wax dhib u keenaya dalkeena meesha looga saaro, Wasaarada Waxbarashadu waa sidaa si le'eg.

Wuxuu xusay, Intaan joognay marka laga reebo arrinta xeebta, wadankeena waxaa yimi marti farabadan sida Donerska iyo madaxda UNHCR, waxaas oo wafti ah waxay ku yimaadeen dedaal

wax nabadgalyo daro ahna may arag Wasiirka iskaashiga caalamiga ee dalka Denmarka, waxaa yimid dhigiisa dalka Ingiriiska, .

Markaa sawirka noocaas ah waa la iswaydiin karaa inagoo ku nool Gobol Gubanaya oo hadana inagu nahay wadan Nabad ah. Pasporadu waxay yaaleen Madaxtooyada, Hadana waxaan u soo wareejinay wasaarada.

Xaga xeebaha markaanu nimi waxaa ku qornaa xeebaha Gabeed Berbera ilaa Saylac waxaa ku qornaa 27 Askari oo ka mid ah ciidanka ilaalada xeebaha oo loogu talo galay in xeebta intaa leeg ay ilaaliyaan, waxaanu dib u dhis ku samaynay ciidanka, oo aanu u samaynay saddex aag oo loo kala qaybiyay Maydh, Berbera iyo Saylac, waxaa ku baxaya kharash badan, kharashkana waxaa naga kafaala qaaday dawlada ingriiska,

Wasaaradu waxa lahayd kow iyo toban Agaasiime waaxeed, hay'adda shaqaaluhuna waxay noo sheegtay in sharciyan ay leedahay lix Agaasime waaxeed intaasaanan ka dhignay.

Xaaladii amaan daro ee ka jirtay, Ceel bardaale iyo bali Cigaal waa lagu guulaystay, wada hadaladii labada dhinac meel fiican bay marayasaa, xaalada Kal-shaale iyo baraagaha la isku qabtay, waxay xukuumaddu kaga go'aan qaada tay, in la aaso, deegaankaasina noqdo dhul daaqeen ciidanka qaranku Saldhig ka samaysto, Wasaarada Arrimaha Dibada u hadli maayo, laakiin se waxaan ka hadlaya qadiyada Wasaaradaasi amniga saamaynta ay ku leedahay.

Wasiirku wuxuu xusay inay maalinta bari uu shir aad u wayni ka dhicidoono Ambassador Hotel oo ay isugu iman doonaan dalalka deeqaha bixiya iyo UNDP, shirkaas oo socon doona Saddex cisho, laguna Gorfayn doono hanta xoog leh in la galiyo booliiska, ana baahidayadaan dhiganaynaa, taas oo hadii markii hore culayska la saarayay tababaro, laakiin hada anagu waxaanu hordhignay inaan wakhtigii Humaniterianka aan ka gudubnay oo aan u gudubnay wakhtigii Developmentiga.

Waxaan doonaynaa xarun wayn oo qurux badan inaan u dhisno booliiska, waxaan doonaynaa Gobolada inaan xarumo fulin kara hawshaa iyo xilkaa in lanooga dhiso, sidoo kale ciidankayagu Uniform malaha, deraja malaha taas oo aan ahayn caalamad shaadhka lagu dhajisto ee waa derajo iyo xurmayn wax badan baa bari noo taxan.

Sidaa darteed waxaan ku rajawaynahay, in isha caalamku ku eegayo Somaliland ee ah nabada in la xoojiyo in bari naloo ogolaan doono wax badan.

***Warbixintaa ka dib, Mudanayaasha Golaha Wakiiladu waxay waydiiyeen Su'alahan:-***

## 1. C/qaadir X. Ismaciil Jirde.

**Su'aal:-**

1. Waxaa Wasaarada Hoos yimaada waxyaalo badan, markaa Wasiir ma kula tahay waxaas oo hawla ee aad sheegtay ku badan yihiin wasaarada, oo loo baahanyahay in laga fududeeyo wasaarada, structureka wasaaradaaduse ma gudan kartaa si cilmiyaysan marka loo eego?
2. Maxaa keenay in la waayo hay'add amniga qaranka u xil saran oo ka madaxbanaan (national security policy) oo loo sameeyo gudi (national security commission) oo hay'addaha qaadhaan bixiyayaasha aanay hagine, inagu hagno?

**Jawaab:-**

1. Mudane C/qaadir, Wasaarada Culays badan baa saran, laakiin caalamka oo dhan waa sidaa oo waa lanala qabaa.
2. Waxa jira guddi aan wali noqon hay'add, madaxweynaha ayaa guddoomiye ka ah, hay'add se wali may noqon, waxaan kuu sheegayaa in aanay siyaasadeena nabadgalyada aanay go'aamin, isla markaana aanay noo jeexin hay'adda UNDP, kolba ninkii meesha jooga ayay ku xidhan tahay.

## 2. Mp. Dable

**Talo-jeedin.**

1. Booliisku haduuna ka dhisnayn Xaga hoose gaaladu waa inay noo furan meelihii wax lagu baranayay, dawladnimadu waa amni markaa maaliyada booliisu wax ku baran lahaayeen waa in loo sameeyaa.

## 3- Saleebaan Yuusf Cali Koore

**Su'aal:-**

1. Xukuumaddu ma leedahay siyaasad ay ku kala saarto nabadiidka iyo dadka degen Buuhoodl?

**Jawaab: -**

1. Haddad ogtahay kuwa nabadiidku inay dagaal bilaabi karaan, waxa nasiib daradu tahay in dadka meesha degan ay waxyeelaan, xukuumadda siyaasadeedu, shacbiga Somaliland mid kaliya ayay u tahay.

## 5. Md. Maxamed Saalax Cige

**Su'aal:-**

1. Xeerka nabad galyada aad sheegtay in madaxweynuhu laalay ma gaf sharcibay ahayd.
2. ta kale ma Xeerka nabad galyada ayaad wax ka badal ku soo samayseen?
3. Sidaan Tv ka aragnay Ciidamad badu 27 askari way ka badnaayeen, xagay mareen?
4. Wasiirka arrimaha dibadu shir- buu ka qaybgalay maxaa idiinka meelyaal wasiirkaa, ma sidii kuwii horaad ka yeelaysaan?

**Jawaab:-**

1. Sharicyada idinkaa sameeya, iskana leh laalistooda.
2. Arrinta nabadgalyada umadaa iska leh siyaasad sharci bayna ka duushaa, siyaasada sharcina sameeya.
3. Ciidanka badu markaanu nimi intaasay ahaayeen (27 askari), kuwaad arragtayna kuwii aan anagu habaynay oo samaynay bay ahaayeen.

## 6- Md. Ibrahim Axmed Haybe

**Su'aal:-**

1. Buuhoodle miyaanay Somaliland ahayn?
2. Airoptkii magacii miyaad ka badasheen Cigaal, sidii Jaraa'idka ku qornayd saaka?

**Jawaab:-**

1. Arrinta Airportka wasiirka ku shaqada leh ayaa la waydiinayaa, anigu waxba kama ogi, mana filayo inay jirto.

## 7. C/qaadir Jaamac Xaamud

**Su'aal:-**

1. Dad badan ayaa ku barakacay dagaaladii Galgala ee Sh. Atom, dadkaas wax kaalmo ah ma fidiseen?
2. Dad bilaa Visa ah ayaa wadanka soo gala, taasna maxaad ka qabateen?

**Jawaab:**

1. Dawladani, waad ogtihiin oo ma leh awood ay taageero ugu fidiso, laakiin inta awoodayada waxaan rabnaa inaan wax tarno.
2. Waanu wadnaa qorshahaa, waxaanan qorshaha noogu jira in dadka soo galaya ee aan somalilanderska ahayn loo sameeyo mustwiqiyayaal.

## 8- Md. Aadan X. Diiriye Dirir.

**Su'aal:-**

1. Maamulka Somaliland wuxuu ka muuqdaa magaalooyinka waaweyn Hadaba maxaa idiinka meelyaal maamulka si aad u gaadhsiisaan ilaa tuulooyinka?
2. Waxaa suuqa ku jirta inaad dad badan oo shaqaalahaaga ah ka joojisay shaqadii maxaa jira?

**Jawaab:-**

1. Anigu shaqaale aan shaqada ka joojiyay ma jirto, hay'adda shaqaalaha ayaa Wasaarad kasta waxay u soo qortay, inta shaqaysa iyo hawlgabka in liiskooda loo soo gudbiyo, qalad kuna waxa uu ka dhacay Agaasimayaasha ayaa liis u gudbiyay, iyadoon Wasiirka lagala tashan, hay'adda shaqaalahana waxaan ku idhi saxa liiskaasi isku shaandhaynta, Agaasimyaashana Xeerbaa awood i siinaya inaan isku badal ku sameeyo.

## 9- Md. Xaashi Cabdi Xuseen

**Su'aal:-**

1. Baarlamaanka booliisku wuxuu arkaa inaan col u nahay taas ma ka dhaadhiciseen arrintaa?
2. Maxay wasaaradu uga baqaysaa in Ajaanibka dalka laga saaro?
3. Waxaa dalka ka dhaca afduub caruureed arrintaa maxaad ka qabateen?

**Jawaab:-**

1. Bilaysku ma necba baarlamaanka, haday wax ka jiraana waxbaan ka qabanaynaa.
2.
3. Arrinta afduubka caruurta, caruurtu waxay ku jiraan dadka jilicsan, arrinkana waa la buun buuniyay, idinkaan idinwaydiinayaa ma jiraa cid caruur laga xaday? Laakiin ma inkirayno anagu waxna waan ka qabanynaa,

1.

## 10.. Md. Xasan Cawaale Caynaan.

**Su'aal:-**

1. Wasiir ururkii Qaran ma damac san tahay, haddii ururada la furo inaad ku dhawaaqdo?

**Jawaab:-**

1. Ururadu doorshada dawlada Hoose, Wasaarada Arrimaha Guddaha ayay hoos yimaadaan, xitaa Xeerkoodu waa inuu ka soo bilowdaa Arrimahaa Guddaha, ururkii Qaran waxa uu u dagaalamayay in ururada la furo, sidaa darteed xisbigii aaminsanaa ayaan ka mid noqonay, madaxweynuhuna ururada ma furo aragtidiisa siyaasadeedayaa ah in ururadii la furo, shalay.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| --- | --- |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka Golaha Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| --------------------------------------------------------------------- | ------------------------------------------------------- |